



## Qof kastaa wuu iman karaa maktabada.


Waxba kuma kharash gareynayso inaad timaado maktabada.

Waad iska iman kartaa xataa haddii aanad buugaag deynsaneyn.



**BIBLIOTEKEN  
I NORRBOTTEN**

BIBBLO.SE  
POLARBIBBLO.SE



## Ku soo dhawow maktabada!



**BIBLIOTEKEN  
I NORRBOTTEN**

# Waxyaalahan ayaa yaala maktabada



Kombiyuutaro iyo internet. Maktabadaha intooda badan waxaad ka helayaas wifi lacag la'aan ah.



Birinter iyo koobi mashiin. Waxa lagaa qaadi dhowr karoon warqad kasta oo aad soo daabacdo ama aad sawirato.



Buugaagta carruurta iyo kuwa dadka waaweyn oo ku qoran luqado badan. Buugaagta qaarkood ayaa ah qaar luqad fudud ku qoran. Waxay ku qoran yihiin jumlado gaagaaban iyo kalmado jiljilicsan. Waxa kale oo jira buugaag la dhageysto



Joornaalo ku qoran luqado badan oo dunidoo dhan ka yimaada. Joornaalada qaarkood waxa lagu helayaa warqad qaarna waxay ku jiraan dhayto bayska loo yaqaan PressReader.



Koorsooyinka luqada iyo Macluumaadka bulshada. Buugaagta naxwaha iyo qaamuusyo.



Haddii aanad helin buugaag ku qoran luqadaada ayaaad shaqaalaha weydiisan kartaa caawimo.



Maktabadaha qaar ka mid ah ayaa haya filimo, muusig iyo ciyaaraha TV-ga.

## Kaadhka maktabada

Markaad haysata kaadhka maktabada ayaaad buugaag, joornaalo ama muusig guriga u qaadan kartaa.



Waxa sidoo kale la sameyn karaa in lagu akhristo maktabada.

La hadal shaqaalaha jooga maktabada si aad u hesho kaadhka maktabada.

Qofka weyni waa inuu tuso aqoonsigiisa si uu u helo kaadhka maktabada. Aqoonsiga la ogol yahay waxa ka mid ah tusaale ahaan, LMA-kaadhka ama baasaaboortu Swiidhish ah, liisan ama ID-kaadh.

Qofka ka yar 18 sanno waa inuu qof weyni caawiyaa si uu u helo kaadhka maktabada. Waxay noqon kartaa hooyada ama aabahaa, gudhmaanakaaga, qareenakaaga ama shaqaalaha meesha aad degantey.

Waxba kuma kharash gareynayso inaad qadato kaadhka maktabada. Laakiin haddii uu kaa lumo kaadhkaaga maktabadu waxa lagaa qaadi 20 kronor si aad mid cusub u hesho.

Sii qaado kaadhkaaga maktabada marka aad tageyso maktabada.

## Marka aad deynsanayso

Waa lacag la'aan in buugaag la deynsado.

Muddo ayaaad haysan kartaa waxaad deynsatay. Waxaad heli doontaa rasiidh halkaas oo ay ku qoran tahay xiliga ay tahay inaad soo celinsoo buugaagta.

Haddii aanad wali dhameynin akhriska buuga ayaa dib u deynsan kartaa marlabaad.

Haddii aad la soo habsaanto buuga waa inaad bixiso kharash. Waxa weeye hal kroon maalintii buug kasata oo aad la soo habsaamtid.

Uma baahnid inaad kharash bixiso haddii aad la soo habsaanto buugaagta carruurta ama haddii aad ka yar 18 sanno.

Haddii aanad soo celin buugaagta waa inaad bixiso buug cusub

## Waxaad sameyn kartaa waxaan kaliya aheyn inaad buugag ka deynsato maktabada.

Maktabada waxaad kula kulmi kartaa dadka kale.

Waxaad iman kartaa maktabada oo aad wax ku akhrisan kartaa.

Marmarka qaarkood ayay maktabadu lagu qabtaa xiliga sheekada carruurta ama qaxwaha luqada ee dadka waaweyn. Maktabadu waxa kale oo ay qaban kartaa waxqabadyada kale. Inta badan waa lacag la'aan in la galo.

## Maktabada internetka



Biblo.se ayaa ah bogga maktabada Norrbotten.

Bogga Biblo.se ayaaad ka raadsan kartaa buugaag oo aad ka arki kartaa waxa yaala maktabada.

Waxaad ka furan kartaa koonto isticmaalaha Biblo.se.

Koontada isticmaalaha ayaa kaga deynsan kartaa waxyaalaha aad guriga ku haysato, ka xejisan kartaa buugaagta dhamaan Norrbotten yaala oo aad kaga deynsan kartaa buugaagta elektrooniga.

## Loogu talo galay carruurta iyo da'yarta internetka ku jirta

Carruurta iyo da'yarta ayaa leh Maktabad Biblioteken i Norrbotten taas oo ah bar internetka oo la yidhaa Polarbiblo.se.

Uma baahnid wax koontada isticmaalaha si aad u soo gasho Polarbiblo.se.

Waxaad Polarbiblo.se lagu sameyn karaa in wax lagu qoro, sawiro, laga khriyo oo wax laga dhageysto. Qoraalka iyo sawirka ayaa lagu soo daabici karaa bogga internetka.

Waa maxay Noras pulka? waa buu dijital ah oo carruurta oo aad ka akhriyi karto Polarbiblo.se. Waxa uu ku qoran yahay luqado badan.

Anaga ka shaqeyna maktabada ayaa jecel inaanu su'aalahaaga ka jawaabno!

